

Talaallada COVID-19 – Monovalent iyo Bivalent

Vaccinate WA
CovidVaccineWA.org



Dabcan waad maqashay erayada “monovalent” ama “bivalent” oo loo adeegsanaayo si loo qeexo talaallada COVID-19. Aan ka hadalno farqiyada u dhexeeya labadaan nooc ee talaallada, iyo muhiimada ay leedahay inaad qaadata kuurada xoojinta ah ee bivalent marka aad u qalanto.

Waa maxay farqiyada u dhexeeya talaallada monovalent iyo bivalent?

Talaalka monovalent waa talaal leh hal unug ama qayb oo fayras ah.

Talaalka bivalent waa talaal leh labo unug ama qayb oo fayras ah.

Noocyadee kamid ah talaalka COVID-19 ayaa ah monovalent, noocyadeese ah bivalent?

Talaallada asalka ah ee COVID-19 ee dhammaan taxaneyaasha aasaasiga ah iyo kuurooyinka xoojinta ah ee asalka ah waa monovalent*. Talaalladaan waxaa laga sameeyay unugta asalka ah ee fayraska keena xanuunka COVID-19.

Xoojinada la cusbooneysiisay ee taallaalada Pfizer iyo Moderna COVID-19 ayaa ah bivalent. Waxaa lagu abuuray unugta asalka ah ee COVID-19, iyo unugyada cusub ee faraca omicron, BA.4 iyo BA.5.

Talaallada bivalent ma ka waxtar badan yihiin monovalent?

Tijaabooyinka caafimaadka ee kuurooyinka xoojinta ah ayaa lagu ogaaday in kuurooyinka xoojinta ah ee bivalent COVID-19 ay baxshaan difaac balaaran oo ka dhan COVID-19 in ka badan kuurooyinka xoojinta ah ee monovalent ayna dheerayn karaan muddada difaaca ka dhanka ah xanuunka daran iyo/ama geerida, gaar ahaanna faraca omicron.

**Kuurada xoojinta ah ee Novavax booster waa monovalent waxaana qaadan kara dadka waawayn ee dhameeyay taxanaha koobaad laakiin aan horey u qaadan kuurada xoojinta ah ee COVID-19 - iyo haddii aysan qaadan karin ama qaadan doonin kuurada xoojinta ah ee talaalka bivalent mRNA. Kuurooyinka xoojinta ah ee Novavax ma beegsadaan faracyada fayraska ee omicron.*

Maxay muhiim u tahay inaan qaato kuurada xoojinta ah ee bivalent?

Waa muhiim inaad qaadata kuurada xoojinta ah ee bivalent waayo waa nooca keliya ee talaalka COVID-19 oo loo sameeyay inay ka hortagto inta badan faracyada fayraka ee omicron ee COVID-19 ka hadda ka jira Maraykanka.

Ma tahay inaan qaato kuurada xoojinta ah ee bivalent haddii aan horey u qaaday COVID-19 ama aan qaatay kuurada xoojinta ah ee xiliga hore ee monovalent?

Haa, waxaa lagu talinayaa inaad qaato kuurada xoojinta ah ee cusub ee bivalent haddii aad u qalanto xataa haddii aad horey u qaaday COVID-19 ama aad horey u qaadatay monovalent. Si loo helo waxtarka ugu sareeya, shaqsiyaadka hadda qaba COVID-19 ayaa ka fakari kara inay dib u dhigaan talaal kasta oo COVID-19 ah, ayna ku jirto kuurada xoojinta ah, muddo 3 billood ah laga bilaabo biloowga astaamahooda ama laga helo caabuqa.

Ma u baahan nahay inaan qaato nooc gaar ah oo kuuradayda xoojinta ee bivalent ah?

Carruurta 6 billood - 4 sano jirada ah waa inay qaataan kuurada cusub ee bivalent taasoo ah isla nooca taxaneyaashooda aasaasiga ah.

Carruurta jira 5 sano ee dhamaysta taxanaha aasaasiga ah ee Pfizer ayaa keliya qaadan kara kuurada xoojinta ah ee cusub ee bivalent.

Carruurta jira 5 sano ee dhamaysta taxanaha aasaasiga ah ee Moderna ayaa qaadan kara kuurada xoojinta ah ee cusub ee Moderna ama Pfizer.

Dadka da'doodu tahay 6 sano iyo kasii weyn ayaa qaadan kara kuurada xoojinta ah ee Moderna ama Pfizer ayadoo aan laga eegayn nooca ay qaateen markii hore.